

Dadka cudurka laga helay way soo raaci karaan haween umulaysa, waanay soo booqan karaan qof aad u buka

Dadka qaba cudurka covid-19 way soo raaci karaan haween umulaysa ama way soo booqan karaan dadka aad u buka ee goob caafimaad jiifa. Waa in booqashada loo samayn karo qaab aan dhibaato ku ahayn ka-hortagga is-qaadsiinta cudurka waana in marka hore lala balamo goobta.

-Qofka waxa u muhiim ah in dadka u dhow ama ehelkiisa ah ay hareerihiisa joogaan marka ay jiraan xaalado gaar ah sida foosha ama xanuun weyn. Taas darteed waxannu fududdaynay in haweenayda umulaysa uu xilliga dhalmada la joogi karo seygeeda ama qofka ay lammaanaha yihiin inkastoo qofkaasi qabo covid-19, iyo in ehelkiisu booqan karaan qof aad u buka ama sakaraad ah inkastoo covid-19 laga helay ehelka. Waxaa sidan la oggol yahay xataa mararka bukaanka laga helay cudurka covid-19, ayay tidhi wasiirka caafimaadka iyo daryeelka - Ingivil Kjerkol. Adeegyada caafimaadka iyo daryeelku waxay muddaddii lagu jiray cudurkan safmarka ah oo dhan ay heleen waayo-aragnimo ku saabsan maarataynta covid-19 iyo sida looga hortago in cudurku ku sii dhex faafo goobta shaqada. Mararkii cudurku ka dillaacay goobaha caafimaadka waxa inta badan sabab u ahaa qof cudurka qabay oo aan ogeyn inuu cudurka qabo. Way yar yihiin mararka qof cudurka lagu ogaa uu sii qaadsiiyay dadka kale.

Taas oo muujinaysa in ay shaqaynayaan tallaaboo yinka ka hortagga is-qaadsiinta cudurka ee ay isticmaalaan goobaha caafimaadka iyo daryeelku marka la ogyahay in qofku qabo covid-19. Taas darteed waxa Agaasinka Caafimaadka iyo Machadka Caafimaadka Dadweynuhu ay aamminsan yihiin in booqdaha ama wehelka laga helay covid-19 aanay wax macno leh ku kordhinayn heerka is-qaadsiinta cudurka ama khatarta is-qaadsiinta cudurka ee ka jirta goobta caafimaadka.

Ehelka iyo wehelka laga helay covid-19 waa inay marka hore la balamaan xarunta oo u sheegan inay imanayaan, islamarkaana ku dhaqmaan talooyinka ay xaruntu siiso.